

Shuruudaha tallaalka cusub iyo tallaabooyinka KOOFID-19 ee Alberta

Sebtember 15, 2021

Alberta waxay ku dhawaaqday xaalad degdeg ah oo caafimaadka dadweynaha ah waxayna hirgelin doontaa tallaabooyin caafimaad oo cusub si loo ballaariyo awoodda, loo kordhiyo heerarka tallaalka loona yareeyo gudbinta KOOFID-19.

Tallaabooyin caafimaad oo ku meelgaar ah oo cusub gacanna ka geysanaya yareynta faafidda KOOFID-19 ayaa lagu dabaqi doonaa gobolka oo dhan. Tan waxaa ku jira xannibaadyo cusub oo ku saabsan makhaayadaha, kulannada gudaha, aroosyada iyo aaska, goobaha dukaameysiga, madadaalada, iyo isboortiga gudaha iyo jirdhiska laga bilaabo Sebtember 20. Tallaabooyinka goobaha shaqada, kulannada gaarka ee gudaha, meelaha cibaadada, dugsiyada iyo waxqabadyada carruurta, iyo sidoo kale afxirashada iyo kala fogeynta jirka ee dhammaan goobaha dadweynaha ee gudaha waxay bilaabmayaan Sebtember 16.

Laga bilaabo Sebtember 20, ganacsiyada ama qabanqaabiyaasha dhacdooyinka oo doorta inay hirgeliyaan barnaamij hubinaya macaamisha caddaynta tallaalka ee ay dawladda soo saartay ama baaritaanka KOOFID-19 oo sida gaarka loo sameeyey oo dhowaan si gaar ah qofka lacag ugu bixin doona ayaa awoodi doona in laga dhaafo xayiraadaha. Haddii meherad ama adeeg uu doorto inuusan u baahnayn caddaynta tallaalka, waxaa laga rabaa inay u hoggaansamaan tallaabooyinka caafimaad ee cusub.

Tallaabooyin cusub oo caafimaadka dadweynaha oo gobolkoo dhan ah

Tallaabooyinka soo socda ayaa dhaqangalaya 16 ka Sebtember:

Goobaha shaqada:

- Tallaabooyin lama huraan ah ee ka shaqeynta guriga ah ayaa jira haddii aan loo shaqeyyaha go'aamin joogitaanka qofka looga baahan yahay wax ku oolnimada hawlgalka.

Kulannada bulsheed ee gaarka ah:

- Kulammada gaarka ah ee gudaha ee loogu talagalay dadka u qalma tallaalka, si buuxda loo tallaalay waxay ku kooban yihiin hal qoys oo lagu daray hal qoys oo kale ugu badnaan 10 qof, iyada oo aan wax xannibaad ah la saarin carruurta ka yar 12 sano.
- Ka qaybgalka kulan kasta oo bulshadeed oo gaar ah looma oggola dadka tallaalka u-qalma ee aan la tallaalin.
- Kulammada bulshadeed ee gaarka ah ee bannaanka ah waxaa loo oggol yahay ugu badnaan 200 oo qof, iyadoo mar walba la ilaalinayo kala fogaanshaha jirka ee labada mitir.

Goobaha cibaadada:

- Goobaha cibaadada waa inay ku koobnaadaan xaadiridda saddex meelood meel tirada xeerka dabka.

- Waji-xidhka ayaa khasab noqon doona waana inay jirtaa laba-mitir fogeyn jireed oo u dhexeeya qoysaska ama laba xiriir oo u dhow kuwa keligood nool.

Dhacdooyinka iyo goobaha dibedda oo aan lahayn qayb gudaha ah (marka laga reebo musqulaha):

- Ma jiraan xannibaado imaansho, si kastaba ha ahaatee kala fogeynta jirka ee labada mitir waa inay meesha ku jirtaa.

Dugsiyada (K-12):

- Afxirashada ayaa lama huraan ah oo loogu talagalay ardayda dhigata fasallada 4 iyo wixii ka koreeya, iyo shaqaalaha iyo macallimiinta dhammaan darajooyinka kala sareeya. Dugsiyada hirgelin kara qorshe badbaado KOOFID ah oo ka duwan ayaa laga dhaafi karaa afxirashada lama huraanka ah.
- Dugsiyada hoose waa inay hirgeliyaan isku duwidda fasalka.
- Hawlaha jimicsiga ee dugsiyada:
 - Dhallinyarada da'dooda tahay 18 jir iyo kuwa ka yar looma baahna inay afxirasho ama ilaaliyaan kala fogaanshaha labaa mitir marka ay ku hawlan yihiin dhaqdhaqaaqa jirka.
 - Ma jiraan wax xaddidaad ah oo ku saabsan hawlaha bannaanka.
 - Isboortiga/waxqabadka/madadaalada/danaha gaarka ah ayaa loo oggol yahay iyada oo shuruudda kala fogeynta jirka ee labada mitir jirta, hadday suurtagal tahay.

Isboortiga carruurta/waxqabadka/madadaalada (isboortiga ka baxsan manhajka, waxqabadka, madadaalada iyo xiisaha gaarka ah):

- Waxqabadyada gudaha waa la oggol yahay, oo leh shuruudo loogu talagalay kala fogeynta jirka labada mitir iyo afxirashada marka ay suurtagal tahay, iyo baaritaanka astaamaha ka qaybgalayaasha.
- Dhallinyarada da'dooda tahay 18 jir iyo kuwa ka yar looma baahna inay afxirasho ama ilaaliyaan kala fogaanshaha jirka inta lagu jiro dhaqdhaqaaq jirka, sida cayaar kooxeedka.
- Ka qaybgalka daawadayaasha waxay ku xaddidan yihiin awoodda lambarka dab demiska saddex meelood meel. Ka qaybgalayaasha waa iney afka xirtaan lana hubiyo kala fogaanshaha jirka ee u dhexeeya qoysas kala duwan ama qof kaligiis nool iyo labada xiriir ee u dhow.
- Ma jiraan wax xaddidaad ah oo ku saabsan hawlaha bannaanka.

Waxqabadyada carruurta:

- Xerooyinka maalinlaha carruurta waa inay lahaadaan kala fogeyn jireed oo laba mitir ah oo u dhexeeya ka qaybgalayaasha iyo afxirashada gudaha.
- Xerooyinka carruurta ee habeenkii waa inay raacaan tusaalooyinka kooxda.

Tallaabooyinka soo socda ayaa dhaqangalaya 20 ka Sebtember:

Makhaayadaha:

- Cunto ku cunidda dibadda ah oo ugu badnaan lix qof miiskiiba (hal qoys ama laba qof oo xiriir dhow la leh kuwa keligood nool).
- Xaddidaadda iibka khamriga iyo isticmaalka (10ka fiidnimo iyo isticmaalka 11ka fiidnimo) ayaa dhaqangal ah.
- Makhaayadaha ayaa u qalma inay hirgeliyaan Barnaamijka Ka dhaafidda Xaddidaadda (Restrictions Exemption Program).

Aroosyada iyo aaska:

- Dhammaan xafladaha iyo adeegyada gudaha waxay ku kooban yihiin 50 ka qaybgale ama boqolkiiba 50 awoodda xeerka dabka, hadba kii yar.
- Lama oggola soo dhaweynta gudaha.
 - Xarunta martigalinta waxay u qalmi doontaa inay hirgeliso Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidaadda (Restrictions Exemption Program).
- Dhammaan xafladaha iyo adeegyada bannaanka ee loogu talagalay aroosyada iyo aaska waa inay ku koobnaadaan 200 qof oo ka qaybgale ah. Soo dhaweynta dibedda waxaa looga baahan yahay inay raacdo iibka khamriga iyo xaddidaadaha isticmaalka (tusaale ahaan, iibka wuxuu dhammaadaa 10 ka fiidnimo iyo isticmaalka wuxuu dhammaadaa 11 ka fiidnimo).
 - Xarunta martigalinta waxay u qalmi doontaa inay hirgeliso Barnaamijka Ka -reebitaanka Xaddidaadda (Restrictions Exemption Program).

Goobaha tafaariiqda, madadaalada (oo ay ku jiraan goob kasta oo gudaha ah, maktabadaha, shirarka, meelaha kirada ah, riwaayado, meelaha lagu caweeyo, baaraka iyo wax la mid ah):

- Imaanshaha ayaa ku xaddidan saddex meelood meel awoodda xeerka dabka oo ka qaybgalayaasha waxaa loo oggol yahay oo keliya inay la yimaadaan qoyskooda ama laba qof oo xiriir dhow la leh kuwa keligood nool. Ka soo qaybgalayaasha waa iney afxir wataan laba mitirna ay kala fogyihiin jir ahaan qoysaska.
 - Xarumahani waxay u qalmaan inay hirgeliyaan Barnaamijka Ka dhaafidda Xaddidaadda (Restrictions Exemption Program).

Qaangaarka (ka weyn 18 sano) isboortiga, jirdhiska, waxqabadka, iyo madadaalada:

- Hawlaha gudaha:
 - Lama oggola fasalo kooxeed ama waxqabadyo gudaha ah.
 - Tababar qof qof ah ama jimicsi gaar ah ayaa la oggol yahay laakiin kala fogeyn jireed ee saddex mitir ayaa loo baahan yahay.
 - Ciyaartooyda xiriir aan laheyn; tartamada gudaha waa la joojiyay marka laga reebo meesha ka dhaafidda tallaalka la siiyay.
 - Xarumahan iyo barnaamijyadan ayaa u qalma inay hirgeliyaan Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidaadda (Restrictions Exemption Program). Ka dhaafidda gaarka ah ayaa sidoo kale lagu bixin karaa iyadoo loo eegayo xaalad kiiseed.
 -
- Ma jiraan wax xaddidaad ah oo ku saabsan hawlaha bannaanka.

Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidaadda (Restrictions Exemption Program)

- Laga bilaabo Sebtembar 20, dadka u qalma tallaalka waxaa laga rabaa inay bixiyaan caddayn tallaalka oo ay dawladda soo saartay ama baaritaanka KOOFID-19 oo ah inaan laga helin oo si ah lacaga loo bixiyay laga soo bilaabo 72 saacadood gudahood si ay u helaan ka qeybgalka dhacdooyin kala duwan oo bulshadeed, madadaalo iyo ikhtiyaar u leh iyo meherado gobolka oo dhan.
- Si aad u gasho meelo gaar ah oo ka qaybgalaya barnaamijka, oo ay ku jiraan makhaayadaha, baararka iyo dhacdooyinka gudaha lagu abaabulay, dadka jira 12 iyo ka weyn ayaa laga rabaa inay muujiyaan caddayntooda tallaalka ama natiijo baaritaanka ah inaan qabin.
- Ganacsatada hirgeliya Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddididda (Restrictions Exemption Program) waxay u shaqayn doonaan sidii caadiga ahayd, haddii ay u adeegayaan oo keliya dadka haysta

caddaynta tallaalka ama kuwa dhawaan sameeyey baaritaan ah inuu qabin oo si gaar ah looga bixiyey lacag, sida waafaqsan shuruudaha meesha yaala. Taas micnaheeda waa inay isla markiiba oo aan xadidnayn u adeegi karaan qof kasta oo u qalma tallaalka kaasoo:

- Uu haysto caddayn tallaalka labalaab ah (ogow in muddada kala guurka ah ee u dhexaysa Sebtember 20 keeda iyo 25 ka Oktoobar, caddaynta qaadashada hal mar ayaa loo qaadan doonaa mid la aqbali karo illaa inta qiyaasta la siiyay laba toddobaad ama ka badan wakhtiga adeegga).
 - Uu hayo warqda ka Dhaafid Caafimaad.
 - Uu hayo caddayn ku dhawaad (72kii saacadood ee la soo dhaafay) baaritaan ah inuu qabiin KOOFID-19 ah (midkood PCR ama Baaritaan Degdeg ah). Baaritaanka laga yaabo in uu noqon mid ka socda Adeegyada Caafimaadka Alberta ama Sheybaarada Alberta.
 - Ka yar 12 jir uma baahna inay keenaan caddaynta tallaalka ama baaritaan inaan laga helin ah si ay u galaan meherad ka qaybqaadata.
 - Barnaamijkan ma khuseeyo meheradaha ama hay'adaha u baahan in loo helo nolol maalmeedka.
- Dadka reer Alberta waxay heli karaan nuqulada diiwaanadooda tallaalka KOOFID-19 iyagoo u sii maraya Diiwaanka Caafimaadkeyga (MyHealth Records). Waqtigan la joogo, reer Alberta waa inay ka fogaadaan inay galaan Diiwaanka Caafimaadkeyga (MyHealth Records) si ay u soo dejistaan diiwaanadooda. Kaarka daabacan, oo la diyaarin lahaa 16 ka Sebtember, ayaa hadda la heli doonaa 19 ka Sebtember.

Si buuxda u isu tallaalka

In ka badan 79.5 boqolkiiba dadka reer Alberta ee u qalma ayaa hadda lagu badbaadiyay ugu yaraan hal qiyaas tallaalka KOOFID-19 iyo boqolkiiba 71.4 ayaa si buuxda loo tallaalay. Tallaallada waxay si weyn u yareeyaan halista natiijooyinka daran iyo halista caabuqa.

Tallaallada waa aaladda ugu awoodda badan ee dagaalka ka dhanka ah KOOFID-19. Ballamaha tallaalka ayaa si ballaaran loo heli karaa iyada oo loo marayo Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) ama farmashiyeyaasha ka qaybgala iyo rugaha dhakhaatiirta. Ka qabso ballantaada alberta.ca/vaccine. Kuurada hore ayaa sidoo kale laga heli karaa goobo caafimaad oo la doorto oo ballan u baahneyn. Laba kuurood ayaa bixiya waxtarka ugu badan iyo ilaalin waarta.

Xogta la xiriirta

- Xogta KOOFID-19 ee reer Alberta ([COVID-19 information for Albertans](#))

Warbaahinta kala duwan

- Daawo shirka wararka ([Watch the news conference](#))

Weydiimaha warbaahinta

Harrison Fleming

780-984-3543

Ku simaha Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

Steve Buick

780-288-1735

Xoghayaha Sare ee Saxaafadda, Caafimaadka

Si aad u hesho ilo badan oo dawladdu turjuntay, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.